

Xannaanada caruurta xaafadaha Vivalla iyo Lundby

Ilmaha waa wax aad u qiimo badan, ilmaha iyo dhalinyarada deggan xaafadeena, kuwa taga xannaanada iyo kuwa dhigta iskoolka 1-16 jir, mid walba garaadkiisa ayaan wax ku bareynaa, iyo baahidiisa. , Taas waxay ku qorantahay manhajka dugsiyada Lpo 94 iyo manhajka xannaanooyinka Lpfö 98, waxaana soo go'aamiyay baarlamaanka Iswidhan. Degmada Örebro waxay leedahay qoraal ku saabsan ilaalinta ilmaha. Waxaana qoray ilmaha iyo dhalinyarada deggan Örebro, waxaana saldhig u ah xeerka caruurta ee ay soo saartay qaramada midoobey.

"Ilmo walba oo ku nool Örebro ayagoo wax laga reebin , waxa uu xaq u leeyahay inuu u noolaado sida noloshiisa ugu haboon, ilmaha ra'yigooda iyo rabitaankooda waxa uu ku xiran yahay da'diisa iyo biseylkiisa." Aragtida mustaqbalka ee ilmaha Örebro (2001)

- Ilmaha/ardayda waxay jecelyihiin inay **wax walba ogaadaan**, sidaa daraadeed waxaan siineynaa fursad ay ku kordhiyaan garaadkooda si ay u horumar uga gaaraan waxay daneynaayaan.
- Ilmaha /ardayda waxay leeyihiin **firfircooni**, sidaa daraadeed waxaan u deyneynaa in mid walba uu intii karaankiisa ah uu waxqabto hawshiisana mas'uuliyadeeda qaado.
- Ilmaha/ardayda wax walba **waa xiiseeyaan** iyo **rabitaan ay rabaan inay wax bartaan**, sidaa daraadeed waxaan rabnaa inaan ogaano ilmo walba qibradiisa iyo waxbarashadiisa hore.
- Ilmaha/ardayda waxay xaq u leeyihiin inay si farxad leh horumar ugu sameeyaan tacliintooda, sidaa daraadeed waa hageeynaa, waxaana gelineynaa xiise ay ku horumariyaan aqoontooda.
- Ilmaha/ardayda waa inay dareemaan **inay faa'ido u yihiin kooxda markaas ay ku jiraan**, därför möter vi varandra med respekt och positiva förväntningar.